balqiis

Warqad Siyaasadeed
Luulyo 2026

# Fursad Kale Ma Jirto: Soomaaliya iyo Waqtiga Kama Dambaysta ah ee Maareynta Kala-guurka Amniga

Sababta shanta bilood ee soo socota ay u go'aamin doonaan in guulaha amni ee Soomaaliya ay sii jiri doonaan marka uu dhammaado saadka Qaramada Midoobay

**Qorayaasha:**

**Mustafa Osman iyo Samira Gaid**



## Acknowledgements

Balqiis Insights waxay warqaddan siyaasadeed ku diyaarisay dib-u-eegis madax-bannaan oo lagu sameeyey dukumentiyada rasmiga ah, isgaarsiinta diblomaasiyadeed, xeerarka iyo waajibaadyada Midowga Afrika iyo Qaramada Midoobay, dukumentiyada miisaaniyadda, iyo wareysiyo lala yeeshay khubaro iyo xirfadlayaal aqoon u leh mawduuca. Falanqayntani waxay sidoo kale ku salaysan tahay isgaarsiin iyo dukumentiyo taageero ah oo la siiyey Balqiis Insights intii ay socotay cilmi-baaristu.

Dhammaan ilaha xogta si taxaddar leh ayaa loo qiimeeyey loona adeegsaday halka ay ku habboonaayeen, si loo xaqiijiyo saxnaanta, macnaha guud, iyo tayada falanqaynta.

Xigashada sawirka Jaldiga: Hawlgalka Taageerada iyo Xasillinta Midowga Afrika ee Soomaaliya (AUSSOM).

© Balqiis Insights 2026. Daabacaaddan waa la xigan karaa, dib ayaa loo daabici karaa, ama waa la wadaagi karaa iyadoo si habboon loo xusayo Balqiis Insights. Lama iibin karo, mana loo adeegsan karo ujeeddooyin ganacsi iyada oo aan oggolaansho hore laga helin Balqiis Insights.

# TUSMADA


| | | |
|---|---|---|
| I | Guudmar Guud | 4 |
| II | Hordhav | 7 |
| III | Xaaladda Siyaasadeed iyo Amni ee Soomaaliya | 8 |
| IV | Sababta UNSOS Muhiim u Tahay | 11 |
| V | Dhibaatada Siyaasadeed | 13 |
| VI | Hababka Siyaasadeed ee La Soo Jeediyey | 15 |
| VII | Qiimeynta Hababka La Soo Jeediyey | 18 |
| VIII | Talo Soo-jeedino | 20 |
| IX | Gunaanad | 22 |
| X | Tixraacyo | 23 |

## Guudmar Guud

Go’aankii Maraykanka ee 1-dii Luulyo 2026 ee ahaa inuusan taageeri doonin sii socoshada Xafiiska Taageerada Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOS) wixii ka dambeeya muddada hadda loo oggolaaday AUSSOM, oo ku eg 31-ka Diseembar 2026, wuxuu si toos ah u caqabadaynayaa habkii loo maalgelinayey loona sii hayey qaab-dhismeedka amniga Soomaaliya iyo kala-guurkiisa. Go’aankani keligiis ma soo afjarayo Hawlgalka Taageerada iyo Xasillinta Midowga Afrika ee Soomaaliya (AUSSOM), maadaama Washington ay sheegtay inaysan ka hor imaan doonin dib-u-cusboonaysiinta howlgalka ee ku salaysan Cutubka VII ee Axdiga Qaramada Midoobay. Hase yeeshee, waxa uu meesha ka saaraya nidaamka saadka ee howlgalka ka dhiga mid shaqayn kara, taas oo dhab ahaan abuureysa howlgal aan lahayn saadkii uu ku shaqayn lahaa. Maadaama la filayo in Maraykanku mowqifkiisa ku dhaqan geliyo awoodda diidmada qayaxan ee Golaha Ammaanka, isaga oo ka hor istaagaya oggolaanshaha laftiisa, halkii uu ku ekaan lahaa joojinta saamigiisa boqolkiiba 25 ee miisaaniyadda la qiimeeyey, arrintu waxay yeelanaysaa culays aad u weyn.

Farqigaas laguma dabooli karo oo keliya in dalalka kale ay kordhiyaan lacagta ay bixiyaan. Sidaas darteed, arrintu lacag oo keliya kuma koobna. Waxay ku saabsan tahay farqiga u dhexeeya howlgal sharci iyo siyaasad ogolaansho (mandate) haysta iyo awoodda hawlgal ee loo baahan yahay si loo fuliyo. AUSSOM waxay sii haysan kartaa oggolaanshaha Golaha Ammaanka wixii ka dambeeya 2026, laakiin haddii aan la helin shidaal, cunto, biyo, daad-gureynta dhaawacyada (CASEVAC), daad-gureynta caafimaad (MEDEVAC), adeegyo caafimaad, gaadiidka ciidamada, taageerada duulista iyo joogtaynta ciidamada goobaha hawlgalka, howlahaas oo UNSOS ku bixiso miisaaniyad sannadle ah oo ku dhow nus bilyan oo doollar, oggolaanshahaasi wuxuu luminayaa inta badan qiimihiisa dhabta ah. Tani waxay ka dhigan tahay in AUSSOM aysan sii shaqayn karin haddii hay’ad kale aysan beddelin taageerada Qaramada Midoobay.

Curyaannimada hawlgal ee soo food leh, ma aha inay noqoto arrin lama filaan ah. Muddo dheer ayay caddayd in AUSSOM ay ku socotay jihadan, iyadoo xaaladda maanta jirta ay ka dhalatay go’aanno la qaatay iyo tallaabooyin la dayacay labadaba.

Go’aanka Maraykanku wuxuu rasmiyeeyey hannaan muuqday ugu yaraan tan iyo May 2025. Maraykanku wuxuu hor istaagay dhaqan-gelinta hannaankii maalgelinta isku-dhafka ahaa ee Qaraarka 2719, kaas oo loogu talagalay in ciidamada Midowga Afrika ee Soomaaliya jooga ay helaan gunnooyin joogto ah oo la saadaalin karo.

Intii u dhexeysay Agoosto iyo Sebteembar 2025, go’aan ka soo baxay Aqalka Cad ayaa lagu joojiyey saamigii boqolkiiba 25 ahaa ee Maraykanku ku lahaa maalgelinta UNSOS. Markii AUSSOM dib loo cusboonaysiinayey Diseembar 2025, Qaraarka 2809 si wadajir ah ayaa loo ansixiyey, balse Maraykanku wuxuu bixiyey farriimo cad oo muujinaya in qaabka taageerada ee hadda jira uusan sii jiri doonin wareeg kale. Waxaa muuqata in ugu yaraan 18 bilood oo digniino cad ahi aysan dhalin qorshe beddel ah oo ay ku heshiiyeen Midowga Afrika ama Dowladda Federaalka Soomaaliya. Warqaddani waxay si toos ah uga hadlayso fashilkaas.

Ugu dambayn, warqaddani waxay ku doodeysaa in go'aanka UNSOS aan loo arkin oo keliya muran la xiriira maalgelinta. Balse, dhibaatadani waxay bannaanka soo dhigaysaa saddex caqabadood oo isku xiran oo ka jira kala-guurka amniga Soomaaliya:

1. Ku-tiirsanaanta joogtada ah ee saadka dibadda.
2. Is-afgaradka xaddidan ee u dhexeeya jilayaasha siyaasadda Soomaaliyeed ee ku saabsan mudnaanta amniga qaranka.
3. Maqnaanshaha waddo maaliyadeed iyo mid hawlgal oo lagu kalsoonaan karo oo horseedi karta amni ay Soomaalidu hoggaamiso.

Xaaladda siyaasadeed ee hadda jirta ayaa caqabaddan ka dhigaysa mid aad uga sii daran. Waxaa lagu gartaa muranno dastuuri ah, jadwal doorasho oo lagu muransan yahay, hakadka wada-shaqaynta Puntland iyo Jubaland la leeyihiin Muqdisho, iyo iska-horimaadkii hubaysnaa ee ugu dambeeyey ee ka dhacay caasimadda bishii Juun 2026. Waxaa arrintan sii adkaynaya in Hawlgalka Kaalmada Kala-guurka ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNTMIS) uu soo afjarmayo 31 Oktoobar 2026, taas oo ka dhigan in Soomaaliya ay muddo sagaal toddobaad gudahood ah wada wajahayso bixitaanka hawlgalka siyaasadeed ee Qaramada Midoobay iyo madasha saadka ee Qaramada Midoobay.

Marka la eego arrimahan, warqaddani waxay ku doodeysaa in Soomaaliya, Midowga Afrika, Qaramada Midoobay iyo saaxiibbada muhiimka ahi ay ka faa'iidaystaan muddada ka harsan wada-xaajoodyada Golaha Ammaanka ee Diseembar 2026 si ay u gaaraan Heshiis Kala-guur. Heshiiskaasi waa inuu ilaaliyaa adeegyada saadka ee aasaasiga ah isaga oo adeegsanaya hannaan taageero oo dib loo qaabeeyey, laguna maalgelinayo dalalka Afrika iyo saaxiibbada diyaar u ah inay taageeraan, halka fulintiisana ay sii waddo Qaramada Midoobay. Sidoo kale waa inuu dejiyo halbeegyo cad oo la fulin karo oo lagu cabbirayo lahaanshaha Soomaaliyeed, wada-shaqaynta Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada, iyo isla-xisaabtanka hay'adaha amniga.

Doorashada maanta taallaa ma aha mid u dhexeysa howlgal caalami ah oo aan dhammaad lahayn iyo wareejin degdeg ah oo aan taageero lahayn. Midkoodna ma hirgeli karo haddii Soomaaliya ay kala qaybsan tahay. Dhammaan xulashooyinka lagu falanqeeyey warqaddan, oo uu ku jiro Heshiiska Kala-guurku, waxay ku xiran yihiin hoggaan Soomaaliyeed oo awood u leh inuu dib u soo celiyo kalsoonida Midowga Afrika iyo dalalka ciidamada ku deeqay (TCCs).

Jidka ugu macquulsan uguna wax-ku-oolka badan waa kala-guur loo fuliyo si heerar ah, oo leh taariikh dhammaad oo cad iyo halbeegyo la fulin karo, kuwaas oo isku xiraya saadka, maalgelinta iyo heshiiska siyaasadeed. Xaaladda kalsooni-darrada ee maanta jirta, erayada guud ee ah "kala-guur ku salaysan xaaladaha jira" waxay niyad-jabiyaan saaxiibbada Soomaaliya. Iyagu waxay u arkaan inay ka dhigan tahay ku-tiirsanaan aan dhammaad lahayn, halka dhinacyada Soomaaliduna ay u fahmi karaan shuruudo mar kasta dib loo beddeli karo. Sidaa darteed, bixitaan la dardargeliyey oo lagu saleeyey halbeegyo cad ayaa ah yool la gaari karo, xitaa muddada kooban ee shanta bilood ah ee wada-xaajoodyadu socdaan. Habka loo fulinayo arrintaas waxaa lagu faahfaahiyey qaybta talooyinka ee warqaddan.

**Sanduuqa 1: Howlgal Ku Dhisan Tiirar La Soo Amaahday**

Sida ku cad Qodobka 24aad ee Axdiga Qaramada Midoobay, Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay (UNSC) ayaa leh masuuliyadda koowaad ee ilaalinta nabadda iyo amniga caalamiga ah. Iyadoo ku dheggan mabda'a ah inaan ciidamo nabad-ilaalin ah loo dirin meel aanay jirin "nabad la ilaaliyo," Qaramada Midoobay waxay waayo-aragnimadii UNOSOM ee 1990-meeyadii u cuskatay inay xaddiddo faragelin toos ah.

Bishii Janaayo 2007, Golaha Ammaanku wuxuu Qaraarka 1744 ku ansixiyey hannaan beddel ah. Midowga Afrika ayaa, markii hore muddo lix bilood ah, ciidamo u diri lahaa Soomaaliya isagoo ku matalaya Golaha Ammaanka. Sidaas darteed, AMISOM—oo markii dambe noqotay ATMIS, haddana ah AUSSOM—waxay tan iyo bilowgeedii ku tiirsanayd afar tiir oo ay dhinacyo kala duwan lahaayeen, midkoodna aan lagu maalgelin hay'adaha Afrika.

| TROOPS | LOGISTICS | STIPENDS | ENABLERS |
|---|---|---|---|
| African TCCs — Uganda, Burundi, Djibouti, Kenya, Ethiopia; Sierra Leone in earlier years; Egypt yet to deploy under AUSSOM. | The UN — UNSOA (2009), then UNSOS. Fuel, rations, medevac, air. Assessed contributions. | The European Union — voluntary. Cut 20% in 2016; paused Dec 2024; partial return Apr 2026. | Bilateral partners — US, UK, Turkey and others. Training, equipment, air support. |

Tiirarkan la soo amaahday ayaa midba midka kale ka dambeeyey u wiiqmay. Sannadkii 2016, Midowga Yurub wuxuu gunnooyinka ciidamada dhimay qiyaastii 20%, isaga oo askarigiiba bishii ka dhigay $822 halkii ay markii hore ka ahayd $1,028. Maalgelintii uu siin jiray gunnooyinka ciidamada Midowga Afrika waxay dhammaatay 31 Diseembar 2024, taas oo abuurtay farqi maaliyadeed oo socday ilaa tabarucaad ikhtiyaari ahi dib u billowday Abriil 2026, iyadoo loo marayo Sanduuqa Nabadda ee Midowga Yurub (EPF).

Qaraarka Golaha Ammaanka ee 2719, oo loogu talagalay in hawlgallada Midowga Afrika loo helo maalgelin joogto ah oo la saadaalin karo oo ka timaadda Qaramada Midoobay, uma hirgelin AUSSOM kaddib diidmadii Maraykanka ee May 2025. Tiirkii saadka ayaa xigay oo burburay: sannadkii 2025, Washington waxay joojisay maalgelintii saamigeeda boqolkiiba 25 ee UNSOS, oo lagu qiyaasay $130 milyan. Dabadeed, warqaddii 1 Luulyo 2026 waxay sheegtay inay gebi ahaanba hor istaagi doonto dib-u-cusboonaysiinta UNSOS. Dhanka kale, AUSSOM waxay la wareegtay $93.9 milyan oo deymo ah oo aan la siin dalalka ciidamada ku deeqay, waxayna heshay ku dhowaad rubuc oo keliya miisaaniyaddeedii 2025.

Gunaanadku waa in heshiis ku-meel-gaar ah oo lix bilood loogu talagalay uu isu beddelay sagaal iyo toban sano, iyadoo tiir kasta uu si muuqata u burburayey. Dhibaatada 2026 ma ahayn arrin lama filaan ah; waxay ahayd burbur la saadaalin karay oo ka dhashay sagaal iyo toban sano oo lagu tiirsanaa xalal ku-meel-gaar ah.

## Hordhac

Hawlgalka Taageerada iyo Xasillinta Midowga Afrika ee Soomaaliya (AUSSOM) waxaa la aas aasay si uu uga sii ambaqaado Hawlgalkii Kala-guurka Midowga Afrika ee Soomaaliya (ATMIS), iyadoo xoogga la saarayo lahaanshaha Soomaaliyeed, xasillinta dalka, iyo wareejinta si tartiib tartiib ah ee masuuliyadaha amniga.[1] Waxaa la qorsheeyey in AUSSOM noqdo howlgal ka fudud kana waara dhinaca siyaasadda marka loo eego hawlgalladii hore ee Midowga Afrika, hase yeeshee waligiis looma qorshayn inuu shaqeeyo isaga oo aan lahayn qaab-dhismeedkii taageerada saadka.

Tan iyo 2009, Xafiiska Taageerada Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOS) wuxuu si joogto ah u bixinayey taageerada saadka ee hawlgallada kala duwan ee Midowga Afrika, isaga oo adeegsanaya qaaraanka la qiimeeyo ee Qaramada Midoobay.[2] UNSOS wuxuu ahaa laf-dhabarta hawlgalka, isaga oo suurtageliyey in ciidamada Midowga Afrika la geeyo goobaha hawlgalka, ay dhaqaaqaan, helaan adeegyada caafimaadka, isla markaana ay sii joogaan furimaha dagaalka.

Mowqifkii Maraykanka ee 1-dii Luulyo 2026 wuxuu si weyn u beddelay jihada doodda siyaasadeed. Markii hore, su'aasha ugu weyn waxay ahayd in AUSSOM dib loo cusboonaysiin doono, la dhimi doono ama dib loo qaabayn doono. Maanta se, su'aashu waxay noqotay mid ka sii qeexan kana culus: ma sii shaqayn karaa howlgal Midowga Afrika ah oo ka socda Soomaaliya haddii laga saaro taageeradii Qaramada Midoobay ee ku tiirsanayd? Haddii aan la isku raacin hannaan beddel u noqda ka hor Diseembar 2026, khatartu ma noqon doonto oo keliya howlgal awooddiisu yaraatay; waxay noqon doontaa howlgal si weyn u curyaama, oo aan awood u lahayn inuu taageero ciidamada Soomaaliyeed ama uu gacan ka geysto ilaalinta deegaannada laga xoreeyey Al-Shabaab.

Sida aan ku doodnay warqaddeennii siyaasadeed ee Securing Somalia's Future: The Strategic Framework for AUSSOM, the Post-ATMIS Mission in Somalia (Agoosto 2024), guusha AUSSOM waxay ku xiran tahay lahaansho Soomaaliyeed oo ka jirta heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, taageero caalami ah oo joogto ah, iyo qorshe bixitaan oo waaqici ah. Maanta dooddaasi waxay leedahay muhiimad ka sii weyn. Kala-guur amni oo guuleysta wuxuu suurtagal noqon karaa oo keliya marka ay is waafaqaan xaaladaha siyaasadeed, kuwa amni iyo kuwa maaliyadeed ee lagama maarmaanka u ah kala-guurka. Warqaddani waxay qiimeynaysaa saamaynta go'aanka Maraykanka iyadoo lagu eegayo xaaladda siyaasadeed iyo tan amni ee Soomaaliya maanta. Waxaan ku doodaynaa in kala-guurka amniga Soomaaliya aan lagu xallin karin oo keliya dib-u-cusboonaysiinta ama wax-ka-beddelka howlgalka. Wuxuu u baahan yahay heshiis siyaasadeed, qorshe maaliyadeed oo waara, iyo hannaan saadka oo la isku halayn karo kana gudbi kara caqabadaha ka dhashay daalka deeq-bixiyeyaasha.

[1] Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) wuxuu socday 2007–2022, waxaana beddelay ATMIS (2022–2024). AUSSOM, oo ah hawlgalka hadda jira, wuxuu si rasmi ah u billowday 1 Janaayo 2025.

[2] Qaab-dhismeedka saadka ee Qaramada Midoobay wuxuu ka soo bilowday UNSOA (2009–2015), waxaana beddelay UNSOS (2015–ilaa hadda), oo bixisa taageerada saadka ee ciidamada Midowga Afrika iyo Ciidamada Ammaanka Soomaaliyeed. UNSOS waxay sidoo kale taageertaa hawlgallada siyaasadeed ee Qaramada Midoobay, oo ay ugu dambeeyaan UNTMIS (2024–2026).

## Xaaladda Siyaasadeed iyo Amni ee Soomaaliya

**Muuqaal Siyaasadeed oo Kala Qaybsan**

Doodda ku saabsan UNSOS waxay ku soo beegmaysaa marxaladda ugu xasaasisan ee siyaasadda Soomaaliya. Dowladda Federaalka waxay wajahaysaa muranno dastuuri ah, xiisado doorasho iyo xiriir sii xumaanaya oo kala dhexeeya mucaaradka, iyadoo habka iyo jadwalka doorashooyinkana ay muran ka taagan yihiin. Sidoo kale, xiriirka u dhexeeya Muqdisho iyo Dowlad-goboleedyada Federaalka ayaa si weyn u xumaaday. Puntland iyo Jubaland waxay si rasmi ah u hakiyeen wada-shaqayntii ay la lahaayeen Dowladda Federaalka, iyagoo ku eedeeyay inay ka tallaabsatay xuduudaha dastuurka. Arrintani ma ahayn mid lama filaan ah, maadaama khilaafaadka siyaasadeed ay si isa soo taraysa ugu milmeen arrimaha taliska amniga, qaybsiga kheyraadka iyo doorka ciidamada dowlad-goboleedyada. Iska-horimaadkii ugu dambeeyay ee Muqdisho ku dhex maray ciidamada dowladda iyo dhinacyo mucaaradka la safan ayaa mar kale muujiyay sida murannada siyaasadeed ay si degdeg ah ugu noqon karaan kuwo amni.

Waxaa sidoo kale jira hannaan ay saaxiibbada caalamigu si cad u dareemeen oo ku saabsan sida loo abaabulo kheyraadka. Markii ciidamada amniga loo adeegsaday muranno siyaasadeed oo ka dhacay Baydhabo, Raas Kambooni iyo sida la sheegay Puntland, Dowladda Federaalka waxay muujisay inay awood u leedahay inay hesho maalgelinta, saadka iyo ciidanka loo baahan yahay si loo geeyo loona joogteeyo hawlgalladaas. Marka laga hadlayo dagaalka Al-Shabaab, se, Dowladda Federaalka waxay si joogto ah u codsataa taageero caalami ah. Isbarbardhiggan wuxuu muujinayaa kala duwanaansho dhinaca mudnaanta ah iyo ku-tiirsanaan ugu yaraan qayb ahaan ka dhalatay doorasho siyaasadeed. Saaxiibbada caalamigu waxay qiimeeyaan waxa ficil ahaan mudnaanta la siiyo, halkii ay ka eegi lahaayeen waxa hadal ahaan mudnaanta loo sheegay.

Xaaladdani waa muhiim, sababtoo ah AUSSOM kuma shaqayso jawi ka go'an siyaasadda dalka. Waxtarka howlgalka wuxuu ku xiran yahay iskaashiga u dhexeeya Dowladda Federaalka, Dowlad-goboleedyada, dalalka ciidamada ku deeqay (TCCs) iyo hay'adaha amniga ee maxalliga ah. Marka Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyadu kala qaybsan yihiin, hawlgalladu way dib u dhacaan ama way istaagaan, isku-duwidda iyo wadaagga sirdoonkuna way adkaadaan, qorshayaasha xasillintuna way wiiqmaan. Kala qaybsanaanta siyaasadeed waxay sidoo kale Al-Shabaab u abuurtaa fursad ay isku muujiso awood deggan oo la saadaalin karo meelaha ay ka maqan yihiin ama lagu muransan yahay hay'adaha dowladda. Tani waxay ahayd mid ka mid ah sababihii lagu xusay Note Verbale-kii Maraykanka, kaas oo tilmaamay in "xifaaltanka gudaha iyo loollanka siyaasadeed" ay sabab u yihiin in taageerada caalamiga ahi aysan u beddelmin horumar la taaban karo.

Xaaladda amni ee Soomaaliya maanta waa mid ka nugul sidii ay ahayd xilli kasta tan iyo 2022. Weerarkii ballaarnaa ee Al-Shabaab qaaday sannadkii 2025 wuxuu dib u rogay inta badan guulihii dhuleed ee laga gaaray ololihii 2022–2023. Tani waxaa si cad u muujiyey qabsashadii Aadan Yabaal bishii Abriil 2025, iyo sidoo kale Moqokori iyo Maxaas. Al-Shabaab waxay weli saameyn ku leedahay deegaanno badan oo miyiga ah, waxayna muujisay inay ka faa'iidaysan karto firaaqaha ka dhasha khilaafaadka siyaasadeed, kala daadsanaanta ciidamada iyo daciifnimada maamulka maxalliga ah. Weerarkii Al-Shabaab iyo wixii ka dhashay waxay si cad u muujiyeen waxa dhaca marka ay yaraadaan hoggaaminta siyaasadeed, isku-duwidda iyo joogtaynta ciidamada. Degmooyinkii lagu wareejiyey ciidamada Soomaaliyeed intii uu socday dhimista ATMIS waxay ka mid ahaayeen goobihii ugu horreeyey ee dib u dhacay.

Intaa waxaa dheer, muuqaalka khatarta amni ee Soomaaliya kuma koobna Al-Shabaab oo keliya.[3] Daacish-ta Soomaaliya (ISIS-Somalia) inkastoo ay ka yar tahay Al-Shabaab isla markaana ay ku urursan tahay deegaan kooban, haddana joogitaankeeda Puntland iyo xiriirrada ay la leedahay shabakadaha dibadda waxay ka dhigayaan inaan loo arki karin khatar yar. Sidoo kale, kala go'a u dhexeeya Puntland iyo Muqdisho wuxuu sababay in la-dagaallanka Daacish uu ka go'o dadaalka qaran ee la-dagaallanka argagixisada.

Dhanka kale, Maraykanku wuxuu kordhiyey hawlgalladiisa ciidan ee tooska ah, isaga oo isla markaana dib uga laabanaya taageeradii dhinacyada badan. Tan iyo Febraayo 2025, wuxuu fuliyey in ka badan 111 duqeyn oo cirka ah, taas oo ka badan laba jibbaar tiradii la fuliyey muddadii maamulka ka horreeyey. Taas macnaheedu ma aha in Maraykanku ka baxayo Soomaaliya; balse wuxuu beddelay qaabka uu u wajahayo, isaga oo ka guuraya taageero dhinacyo badan leh una wareegaya iskaashi laba geesood ah iyo duqeymo ciidan. Si kastaba ha ahaatee, duqeymaha cirka waxay burburin karaan bartilmaameedyada hoggaanka, balse ma hayn karaan dhul, ma maamuli karaan khadadka saadka, mana daad-gureyn karaan dhaawacyada.

Ugu dambayn, waxaa jira arrin kale oo mudan in si taxaddar leh loo eego. Iyadoo mustaqbalka AUSSOM uu noqday mid mugdi ku jira, waxaa qaar ka mid ah goobaha siyaasadda caalamiga ah ka soo baxaya dood ku saabsan suurtagalnimada wada-hadal lala yeesho Al-Shabaab. Aragti kasta oo ay Soomaalidu ugu dambayn qaadato arrintaas, hal mabda' waa inuu hagaa doodda: wada-hadal lagu galo xilli saadka iyo awoodda hawlgalku sii wiiqmayaan waa wada-hadal laga galayo meel daciif ah. Sidaas darteed, isku xigxiga tallaabooyinka la qaadayo ma aha arrin farsamo oo keliya, balse waa go'aan istaraatiiji ah.

[3] Faahfaahin dheeraad ah ka eeg warqaddeenna kooban ee La-dagaallanka Soomaaliya ee Xagjirnimada Rabshadaha Wadata: Al-Shabaab iyo Daacish-ta Soomaaliya (Abriil 2025).

**Daalka Deeq-bixiyeyaashu Waa Mid Dhismeed, Ma Aha Mid Ku-meel-gaar ah**

Xaaladda hadda jirta waxaa qayb ka ah daalka sii kordhaya ee deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah. Saaxiibbada Soomaaliya waxaa saaran cadaadis ay ku dhimayaan kharashaadka muddada dheer ee amniga, isla markaana ay dalbanayaan in Soomaaliya ay si weyn ula wareegto mas'uuliyadda amnigeeda. Mowqifka Maraykanku wuxuu ka tarjumayaa jawigan guud. Farriinta Washington kuma koobna oo keliya kharashka UNSOS, balse sidoo kale waxay muujinaysaa qiimeyn siyaasadeed oo ah in taageerada caalamiga ahi aysan weli horseedin midnimo Soomaaliyeed oo ku filan, dib-u-habayn waarta oo lagu sameeyo hay'adaha amniga, ama horumar joogto ah oo laga gaaro la-dagaallanka kooxaha hubaysan.

Marka laga eego heerka caalamiga ah, miisaaniyaddii Maraykanka ee sannad-maaliyadeedka 2026 waxay soo jeedisay in gebi ahaanba la joojiyo maalgelinta hawlgallada nabad-ilaalinta ee Qaramada Midoobay, iyadoo daymaha Maraykanka ee ku aaddan hawlgalladaas lagu qiyaasayo ku dhowaad 2.4 bilyan oo doollar. Dhanka kale, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu faray in kharashaadka hawlgallada la dhimo 15 boqolkiiba. Midowga Yurub, oo ah maalgeliyaha ugu weyn ee hawlgallada Midowga Afrika ee Soomaaliya tan iyo 2007, ayaa joojiyey bixinta gunnooyinka ciidamada bishii Diseembar 2024, inkasta oo uu bishii Abriil 2026 bixiyey xirmo taageero ah oo dhan 75 milyan oo Yuuro iyada oo loo marayo European Peace Facility. Sidaas darteed, Soomaaliya waxay wajahaysaa laba imtixaan oo isku mar socda: inay ilaaliso taageerada ay weli u baahan tahay, isla markaana ay muujiso in taageerada caalamiga ahi u beddelmayso awood qaran oo la isku hallayn karo.




**Eighteen months of warnings produced no contingency plan. That failure — is the one Somalia and the AU can still correct.**

## The collapse was foreseeable — and foreseen

## UNSOS: Laf-dhabarta Howlgalka AUSSOM

UNSOS inta badan waxaa loo arkaa xafiis bixiya taageero farsamo. Hase yeeshee, dhab ahaan wuxuu ahaa tiirka istaraatiijiga ah ee suurageliyey hawlgallada Midowga Afrika ee Soomaaliya. Wuxuu bixiyaa taageerada uu howlgalka Midowga Afrika ku tiirsan yahay si uu uga shaqeeyo xaaladda adag ee amniga Soomaaliya. Adeegyadiisa ugu muhiimsan waxaa ka mid ah shidaalka, raashinka iyo biyaha; daad-gureynta dhaawacyada (CASEVAC), daad-gureynta caafimaadka (MEDEVAC) iyo adeegyada caafimaadka; taageerada duulista iyo gaadiidka cirka; isgaarsiinta; adeegyada injineernimada; hoyga; iyo magdhowga qalabka ay leeyihiin dalalka ciidamada ku deeqay. Kuwani ma aha adeegyo maamul oo keliya, balse waa adeegyada go'aamiya in AUSSOM ay sii jiri karto, is-difaaci karto, taageeri karto ciidamada Soomaaliyeed, isla markaana uga jawaabi karto khataraha amni.

UNSOS waxay sidoo kale gaarsiisaa taageero saad oo aan hub ahayn Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ee ka qayb qaata hawlgallada wadajirka ah. Taageeradan waxaa lagu maalgeliyaa Sanduuqa Taageerada Ciidamada Ammaanka Soomaaliyeed (Somali Security Forces Trust Fund), balse waxaa lagu qaybiyaa kaabeyaasha UNSOS. Inkasta oo tirada ugu badan ee la qorsheeyey ay gaareyso 20,900 askari, muddooyinkii u dambeeyey waxaa si dhab ah loo taageerayey qiyaastii 17,400 askari. Taageeradaasi waxay hakad gashay markii sanduuqaasi uu lacagtii ka dhammaatay. UNSOS waxay joojisay sahaydii joogtada ahayd ee ciidamada Soomaaliyeed bishii Diseembar 2025, inkasta oo ay dhawaan dib u billowday bixinta raashinka. Intii hakadkaasi jiray, adeegga keliya ee si joogto ah u sii socday wuxuu ahaa daad-gureynta dhaawacyada (CASEVAC). Sidaa darteed, CASEVAC maanta waa adeegga ugu dambeeya ee weli si joogto ah u shaqaynaya, waana adeegga ugu horreeya ee ay tahay in la ilaaliyo haddii la dhisayo hannaan cusub oo beddela UNSOS. Xiritaanka UNSOS wuxuu meesha ka saari doonaa habkii lagu gaarsiin jiray taageerada ciidamada Soomaaliyeed, xitaa haddii deeq-bixiyeyaashu weli bixiyaan maalgelinta.

Miisaaniyadda UNSOS ee la soo jeediyey sannad-maaliyadeedka 2025–2026 waxay gaareysay 537.2 milyan oo doollar, taas oo koror dhan 37.4 milyan oo doollar ka ahayd miisaaniyaddii hore ee ahayd 499.8 milyan oo doollar. Kororkaasi wuxuu ka tarjumayey baahiyaha hawlgal ee sii kordhay iyo kharashaadka lagu sii haynayo howlgal weli wajahaya khataro amni oo joogto ah. Inkasta oo miisaaniyadda AUSSOM ay ka yar tahay tan UNSOS, haddana howlgalka wuxuu si weyn ugu tiirsan yahay madasha taageerada ee Qaramada Midoobay.

Sidaas darteed, khatarta taagan waa howlgal aan lahayn saad. Xaaladdan oo kale waxay wiiqi doontaa niyadda ciidamada, xawaaraha hawlgallada, adeegyada caafimaadka iyo daad-gureynta dhaawacyada, ilaalinta ciidamada, iyo tan ugu muhiimsan, rabitaanka dalalka ciidamada ku deeqay (TCCs) inay sii joogaan Soomaaliya. Dalalkaasi way ku adkaan doontaa inay sharxaan sababta ay ciidamadoodu ugu sii joogaan goob dagaal oo adag, haddii aysan jirin saad lagu kalsoonaan karo, adeegyo nololeed, daad-gureyn dhaawac iyo gunnooyinkii ciidamada oo dib u dhac ku yimid.

Qaab-dhismeedka maalgelinta ee hadda halista ku jira waxaa lagu soo koobay shaxda hoose. Farqiga weyn ee ka muuqda shaxdan ayaa ah udub-dhexaadka dhibaatada ay warqaddani ka hadlayso.

| | Item | Amount (USD) | Status / Source |
|---|---|---|---|
| 1 | Miisaaniyadda UNSOS, FY 2025/26 | US$537.2 million | La ansixiyey; saamigii Maraykanka ee qiyaastii 25% ayaa la hakiyey kadib go'aankii dib-u-celinta miisaaniyadda (rescission) ee |
| 2 | Miisaaniyadda UNSOS, FY 2026/27 | US$481.7 million | La ansixiyey; hoos u dhac 7.5% ah oo qayb ka ah dhimista guud ee miisaaniyadda hawlgallada nabad-ilaalinta ee Qaramada |
| 3 | Miisaaniyadda Guud AUSSOM | US$166.5–190 million | Inta badan maalgelin ma helin; qiyaastii 25% oo keliya ayaa la helay sannadkii 2025. |
| 4 | Daymaha ATMIS ee dalalka ciidamada ku deeqay (TCCs) (2022–2024). | US$93.9 million | Weli aan la bixin |
| 5 | Gunnooyinka sanadlaha ee loo baahanyahay | ~US$200 million | Maalgelinta waxaa qayb ahaan daboolay Sanduuqa Nabadda ee Midowga Yurub (EPF) (€75 milyan, Abriil 2026). |
| 6 | Ballanqaadyada maalgelinta ee la xaqiijiyey sannadka 2026. | ~US$120 million | Warbixinta Waaxda Hawlgallada Taageerada Nabadda ee Midowga Afrika (AU PSOD) ee loo gudbiyey Guddiga Shaqaalaha Militariga, |

Qaab-dhismeedka taageerada ee Qaramada Midoobay, oo miisaaniyaddiisu ka badan tahay 500 milyan oo doollar sannadkii, wuxuu muddo dheer ku tiirsanaa qaaraanka khasabka ah ee dalalka xubnaha ka ah Qaramada Midoobay, kaas oo ilaa hadda ahaa ilo maalgelin oo la saadaalin karo. Taageerada saadka ee UNSOS ayaa sidoo kale qiyaastii saddex jibbaar ka badan miisaaniyadda AUSSOM, taas oo u dhaxaysa 166.5 milyan ilaa 190 milyan oo doollar sannadkii. Dhanka kale, AUSSOM waxay inta badan ku tiirsanayd tabarucaad ikhtiyaari ah, iyadoo muddo dheer la daalaa dhacaysay maalgelin yari.

Dalalka ciidamada ku deeqay (TCCs)—Uganda (4,500 askari), Itoobiya (2,500), Jabuuti (1,520), Kenya (1,410), iyo Burundi, oo weli ku jirta geeddi-socodkii bixitaanka iyadoo lagu beddelayo Masar (1,091)—ayaa si dadban u maalgeliyey howlgalka, iyagoo aqbalay dib u dhacyo muddo bilo ah ku yimid gunnooyinkii ciidamadooda.

Marka la waayo tiirkii lagu dhisay qaaraanka khasabka ah, xilli uu tiirkii ku dhisnaa tabarucaadka ikhtiyaariga ah horeba u liitay, waxaa burburaya qaab-dhismeedkii maalgelinta ee howlgalka. Guddiga Shaqaalaha Militariga ee Midowga Afrika (AU Military Staff Committee) ayaa arrintan si cad u aqoonsaday intii uu socday shirkiisii aan caadiga ahayn ee 3 Luulyo 2026, isagoo ka digay caqabado hawlgal oo culus, isla markaana bilaabay hannaan wadatashi ah oo ka bilaabanaya dib-u-eegis heer farsamo iyo militari, una gudbaya Taliyeyaasha Ciidamada Difaaca, shir aan caadi ahayn oo Golaha Nabadda iyo Ammaanka, ugu dambayna shir aan caadi ahayn oo Madaxda Dowladaha Midowga Afrika.

## Dhibaatada Siyaasadeed

Caqabadda siyaasadeed ma aha in Soomaaliya ay ugu dambayn si buuxda ula wareegto mas'uuliyadda amnigeeda. Taasi waa himilo ay wada aqbaleen dhammaan dhinacyadu, oo uu ku jiro Maraykanku. Caqabadda dhabta ahi waa sida halkaas lagu gaari karo iyada oo aan la abuurin firaaq amni oo ay ka faa'iidaystaan Al-Shabaab iyo Daacish-ta Soomaaliya. Joogsiga degdegga ah ee taageerada UNSOS si toos ah uguma horseedayo isku-filnaansho amni; wuxuu bannaanka soo dhigi karaa tabar-darrada qaab-dhismeedka kala-guurka ee hadda jira. Kala dhimistii ATMIS ee 2023–2024 waxay hore u muujisay in wareejin degdeg ahi ay keento dib-u-dhac, halkii ay ka abuuri lahayd lahaansho Soomaaliyeed.

Warqaddani waxay tilmaamaysaa afar farqi oo waaweyn. Midda koowaad waa farqiga saadka. Ciidamada Soomaaliyeed iyo AUSSOM weli ma haystaan hannaan beddeli kara UNSOS, mana jiro dhinac hadda awood u leh inuu muddo kooban ku dhiso awooddaas. Midda labaad waa farqiga siyaasadeed. Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyadu weli iskuma waafaqsana mudnaanta amniga, qaabka taliska iyo qorshayaasha xasillinta, iyadoo Puntland iyo Jubaland ay hakiyeen wada-shaqayntii ay la lahaayeen Muqdisho. Midda saddexaad waa farqiga maalgelinta. Ma jiro hannaan waara oo lagu maalgelin karo AUSSOM, lagu taageeri karo ciidamada Soomaaliyeed, laguna xasillin karo deegaannada la soo celiyey iyadoo taageerada deeq-bixiyeyaashu sii yaraanayso. Midda afraad waa farqiga hay'adaha. Hawlgalka UNTMIS wuxuu dhammaanayaa 31 Oktoobar 2026, taas oo meesha ka saaraysa hawlgalkii siyaasadeed ee Qaramada Midoobay iyo doorkiisii isku-duwidda kala-guurka laba bilood ka hor inta aysan dhammaan taageerada saadka. Sidaas darteed, Soomaaliya waxay hal mar wajahaysaa saddex kala-guur oo isku beegan.

Farqiyadan waxay sidoo kale ka muuqdaan qorshayaasha Dowladda Federaalka. Dowladda waxay dejisay qorshe saddex marxaladood ah oo lagu gaarayo madax-bannaani buuxda oo dhinaca amniga ah marka la gaaro 2032: xoojinta (2026–2028), lahaanshaha (2028–2030), iyo madax-bannaanida (2030–2032). Qorshahani wuxuu ku salaysnaa in saaxiibbada caalamiga ahi sii wadaan taageerada muhiimka ah sida gaadiidka istaraatiijiga ah, sirdoonka, daad-gureynta caafimaadka iyo saadka. Mowqifkii Maraykanka ee 1 Luulyo 2026 ayaa beddelay mala-awaalkaas.

Dowladda Federaalka waxay sidoo kale ku doodday in kala-guurku noqdo mid ku salaysan xaaladaha jira, awoodda jirta iyo hirgelin taxaddar leh. Hase yeeshee, xaaladda dibadda ayaa hadda isu beddeshay mid ku xiran waqti kama dambays ah. Qorshaha lixda sano ee Dowladda Federaalka wuxuu maanta la kulmayaa saacad shan bilood ah oo dhinaca maalgelinta ah, mana jiro qorshe siyaasadeed oo labadaas isu waafajinaya.

Sida aan ku doodnay warqaddeennii hore ee Balancing Autonomy and Stability: UNSOM's Transition to a Country Office in Somalia (Sebteembar 2024), kala-guurrada Soomaaliya waa inay ku salaysnaadaan halbeegyo cad, ee aysan ku xirnaan taariikho go'an oo keliya. Hase yeeshee, jawiga kalsoonida ayaa is beddelay. Meesha ay kalsoonidii u dhexeysay Soomaaliya iyo saaxiibbadeedu hoos u dhacday, hadalka ah "kala-guur ku salaysan xaaladaha jira" kalsooni dambe ma abuuro. Sidaa darteed, xalka ugu macquulsan ma aha waqti kama dambays ah oo adag ama shuruudo aan dhammaad lahayn, balse waa isku darka labadaba.

Taariikh kama dambays ah oo aan dib loo riixi karin waa in lagu lammaaniyaa halbeegyo cad oo hagaya xawaaraha iyo qaabka dhimista howlgalka. AUSSOM waa inay bil kasta Golaha Nabadda iyo Ammaanka ee Midowga Afrika uga warbixisaa heerka lagu fuliyey halbeeg kasta. Waqti kama dambays ah oo aan lahayn halbeegyo wuxuu abuuraa muuqaal madax-bannaani, balse wuxuu burburiyaa awoodda lagu hirgelin karo; halka halbeegyo aan lahayn waqti kama dambays ahi ay dhalinayaan howlgal aan waxba kaga duwanayn kan hadda jira.

Hadafka siyaasadeed ee degdegga ahi waa inuu noqdaa in laga hortago hakad kedis ah oo ku yimaada saadka, iyadoo cadaadiska ka dhashay go'aanka Maraykanka loo adeegsanayo sixidda tabar-darradii muddada dheer jirtay. Soomaaliya waa inaysan ku ekaan inay saaxiibbada ka codsato in nidaamka hadda jira sidii uu yahay loo sii wado. Saaxiibbadu sidoo kale waa inaysan go'aankan u adeegsan inay ku khasbaan Soomaaliya wareejin aan waaqici ahayn. Hawshu waa in la dejiyo kala-guur siyaasad ahaan lagu kalsoonaan karo oo la hirgelin karo, maaliyad ahaan waaqici ah, hawlgal ahaanna ammaan ah.

## Xilli ay Nuglaantu Heerkii ugu Sarreeyey Marayso

### Siyaasadda

- Puntland iyo Jubaland waxay hakiyeen wada-shaqayntii ay la lahaayeen Muqdisho; iska-horimaadyo hubaysan ayaa ka dhacay caasimadda bishii Juun 2026.
- Dowlad-goboleedyada waxaa loo helay saad, maalgelin iyo ciidamo lagu geeyo Baydhabo, Raaskambooni iyo Garoowe, halka dagaalka Al-Shabaab weli loogu tiirsan yahay taageero caalami ah, gaar ahaan gaadiidka cirka.
- Saaxiibbada caalamigu waxay qiimeeyaan mudnaanta ka muuqata ficillada, ee ma aha tan lagu sheegayo hadallada.

### Amniga

- Weerarkii Al-Shabaab ee 2025 wuxuu dib u rogay inta badan guulihii laga gaaray ololihii 2022–2023, oo ay ku jiraan Aadan Yabaal, Moqokori iyo Maxaas.
- Degmooyinkii lagu wareejiyey ciidamada Soomaaliyeed intii lagu jiray dhimista ATMIS ayaa noqday kuwii ugu horreeyey ee dib u dhacay.
- Maraykanku wuxuu fuliyey duqeymihii cirka ee ugu badnaa tan iyo Febraayo 2025 (111+), hase yeeshee duqeymaha cirka ma hayn karaan dhul mana sugi karaan khadadka saadka.

### Deeq bixiyaasha

- Miisaaniyadda Maraykanka ee FY2026 waxay soo jeedisay in gebi ahaanba la joojiyo maalgelinta hawlgallada nabad-ilaalinta ee Qaramada Midoobay, iyadoo daymaha ku ururayna lagu qiyaasayo ku dhowaad $2.4 bilyan.
- Qaramada Midoobay waxay amartay in kharashaadka hawlgallada nabad-ilaalinta la dhimo 15%.
- Midowga Yurub, oo ahaa maalgeliyaha ugu weyn ee taariikhiga ah (€2.8 bilyan), wuxuu dib u bilaabay taageeradiisa qayb ahaan bishii Abriil 2026 (€75 milyan).

## Hababka Siyaasadeed ee La Haysto

Waxaan soo bandhigaynaa afar xulasho oo siyaasadeed. Midkoodna kharash la'aan ma aha, halka mid ka mid ahi durba si weyn u xanniban yahay. Xulasho kastaa waxay si gaar ah isu dheellitiraysaa lahaanshaha Soomaaliyeed, taageerada caalamiga ah iyo khatarta hawlgalka.

**Talo soojeedinta koowaad** waa in taageerada UNSOS la sii wado wixii ka dambeeya 2026, iyadoo lagu xirayo halbeegyo ka adag kuwii hore. Tani waxay ilaalin lahayd madasha saadka ee ugu kalsoonida badan, waxayna yareyn lahayd khatarta degdegga ah. Waxay sidoo kale siin lahayd masuuliyiinta Soomaaliyeed waqti dheeraad ah oo ay ku xoojiyaan diyaargarowga ciidamada, nidaamka mushaharka, kormeerka wax-iibsiga, isku-duwidda Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada, iyo hirgelinta xasillinta. Daciifnimadeedu waa dhinaca siyaasadda. Way adkaan kartaa in maalgeliyeyaasha waaweyn lagu qanciyo inay sii taageeraan hannaan ay u arkaan mid aan lahayn waqti kama dambays ah oo cad, isla markaana aan si ku filan ugu xirnayn natiijooyin la cabbiri karo. Intaa waxaa dheer, kaddib warqaddii Maraykanka ee Luulyo, xulashadani waxay sii jiri kartaa oo keliya haddii mowqifka Maraykanku is beddelo ama hannaanka wax laga beddelo.

**Talo soojeedinta labaad** waa in UNSOS lagu beddelo hannaan saad iyo maalgelin oo uu hoggaamiyo Midowga Afrika. Tani waxay ka jawaabi lahayd walaaca Maraykanka iyadoo laga guurayo qaabka taageerada Qaramada Midoobay. Waxay xoojin kartaa lahaanshaha Afrika, waxayna abuuri kartaa nidaam taageero oo si gaar ah ugu habboon AUSSOM. Hase yeeshee, Midowga Afrika hadda ma haysto kheyraadka iyo hannaan la tijaabiyey oo beddeli kara UNSOS heerka loo baahan yahay. Haddii aan la helin maalgelin la saadaalin karo, awood wax-iibsi iyo kaabayaal hawlgal, xulashadani waxay siddaa khatar hawlgal oo weyn.

Waa in la xusuustaa in qaabka laba-geesoodka ahi aanu ahayn fikrad cusub; waa qaabkii uu hawlgalku markii hore ku bilowday. Markii AMISOM la geeyey Soomaaliya 2007, ciidamada waxaa lagu maalgelinayey heshiisyo kala duwan oo laba-geesood iyo tabarucaad ikhtiyaari ah, iyadoo taageero weyn ay ka imanaysay Maraykanka iyo saaxiibbada Yurub. UNSOA, oo ahayd hay'addii ka horreysay UNSOS, waxaa la sameeyey 2009 sababtoo ah qaabkaasi wuxuu noqday mid aan la saadaalin karin, aan sinnayn, isla markaana aan awoodin inuu joogteeyo howlgal sii ballaaranaya. Sidaas darteed, ku noqoshada maalgelinta laba-geesoodka ahi waa suurtagal, balse waxay noqonaysaa ku noqoshada qaabkii loo sameeyey UNSOA iyo UNSOS si ay u saxaan.

Waxaa sidoo kale mudan in la xuso qaab dhexe: Ciidanka Wadajirka ah ee Dalal Badan ee la-dagaallama Boko Haram (MNJTF). Qaabkan, dalalka ay khatartu saameyso ayaa ciidamo ku biiriya, badanaana iyaga ayaa maalgelinaya cutubyadooda ka hawlgala waaxyahooda, iyagoo hoos taga talis wadajir ah. Midowga Afrika ayaa bixiya isku-duwid istaraatiiji ah iyo taageero saad, oo ay ku jirto tan laga helo Xarunta Saadka Qaaradda ee Douala, halka Midowga Yurub uu maalgelinta u sii mariyo Midowga Afrika. Qaar ka mid ah qaabkan waxay ku habboonaan karaan Soomaaliya, gaar ahaan dalalka deriska ah sida Itoobiya, Kenya iyo Jabuuti oo durba ka hawlgala meel u dhow xuduudahooda. Hase yeeshee, khibradda MNJTF waxay muujinaysaa baahida taxaddarka, maadaama uu la kulmay maalgelin-yari joogto ah, isku-duwid aan sinnayn iyo saameyn siyaasadeed oo ka timaadda dalalka xubnaha ka ah. Sidoo kale, ciidamada AUSSOM waxaa ku jira dalal aan Soomaaliya deris la ahayn, sida Uganda iyo Masar, kuwaas oo aan si fudud ugu shaqayn karin qaabka is-maalgelineed ee dalalka xuduudaha wadaaga.

**Talo soojeedinta saddexaad** waa in la dedejiyo wareejinta masuuliyadaha amniga ee ciidamada Soomaaliyeed, iyadoo la dhimayo doorka AUSSOM. Tani waa xulashada sida weyn xoogga u saaraysa madax-bannaanida. Siyaasad ahaan way soo jiidan kartaa, waxayna ku riixi kartaa masuuliyiinta Soomaaliyeed inay yeeshaan lahaansho xooggan. Hase yeeshee, xaaladda hadda jirta waa tan ugu khatarta badan. Awoodda, isku-duwidda iyo joogtaynta ciidamada Soomaaliyeed weli isku heer ma aha. Dib-u-dhacyadii 2025 waxay caddeyn u yihiin waxa ka dhalan kara wareejin la dedejiyo iyadoo xaaladuhu sidan yihiin. Xulashadani waxay sidoo kale ku dhisan tahay isku-duubni federaal iyo dowlad-goboleed oo aan hadda jirin. Ciidamada laguma wareejin karo qaab talis oo qaar ka mid ah Dowlad-goboleedyadu aysan aqoonsanayn. Wareejin lagu degdego waxay firaaq amni ka abuuri kartaa deegaanno ay Al-Shabaab durba ka raadinayso meelaha nugul.

**Talo soojedinta afraad** waa Heshiis Kala-guur oo lagu wada xaajoodo. Xulashadani waxay muddo cayiman ilaalinaysaa hawlaha ugu yar ee lagama maarmaanka ah, iyadoo la adeegsanayo hannaan isku-dhafan: taageerada Qaramada Midoobay oo dib loo qaabeeyey, ay maalgelinayaan Midowga Afrika, saaxiibbada diyaar u ah iyo suurtagal ahaan Midowga Yurub, balse lagu maamulayo nidaamyada Qaramada Midoobay. Isla markaasna waxaa la dejinayaa qorshe marxaladaysan oo hawlo gaar ah oo dhinaca saadka, hawlgallada iyo xasillinta ah loogu wareejinayo hay'adaha Soomaaliyeed iyo kuwa Midowga Afrika. Heshiisku wuxuu yeelanayaa halbeegyo, ballanqaadyo maaliyadeed, wada-hadal siyaasadeed, isku-duwidda amniga ee Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada, iyo dib-u-eegis bille ah. Tani waa xulashada ugu waaqicisan, maadaama ay ka fogaanayso ku-tiirsanaan aan dhammaad lahayn iyo bixitaan kedis ah, isla markaana ay la jaanqaadayso tilmaamaha ay dhinacyada ay khusayso hore u bixiyeen.

Waxaa mudan in si gaar ah loo tixgeliyo hannaan wax-ku-ool ah. Midowga Afrika hadda ma haysto, mana dhisi karo ka hor 2027, nidaamyada wax-iibsiga, agabka duulista iyo kaabeyaasha goobaha hawlgalka ee ay maamusho UNSOS. Dhab ahaan, Qaramada Midoobay ayaa ah hay'adda keliya ee awood u leh inay taageero baaxaddan leh bixiso. Hase yeeshee, waxaa jira tusaalooyin hore oo muujinaya in maalgelin hal-abuur leh lagu fulin karo taageero ay Qaramada Midoobay bixiso. Qubrus, dowladda martigelisa ayaa muddo tobannaan sano ah bixisay qiyaastii saddex-meelood meel miisaaniyadda UNFICYP, oo hadda u dhiganta $18–19 milyan. Gobolka Saaxil, MINUSMA waxay taageertay Ciidanka Wadajirka ah ee G5 Sahel iyadoo ku shaqaynaysa hannaan lacag-celin ah oo uu maalgeliyey Midowga Yurub. Soomaaliya gudaheeda, Sanduuqa Taageerada Ciidamada Ammaanka Soomaaliyeed, oo ay wax ku biiriyeen Maraykanka, Hindiya iyo dalal kale, ayaa muddo dheer lacagaha tabarucaadka ah u mariyey nidaamyada fulinta ee Qaramada Midoobay.

Sidaas darteed, **waddada dhexe ee suurtagalka ahi waa** xirmo ay maalgelinayaan Midowga Afrika iyo saaxiibbada diyaar u ah, balse ay Qaramada Midoobay fulinayso. Soomaaliya waxay bixin kartaa qayb, xitaa haddii ay yar tahay, si ay u muujiso niyad-wanaag iyo masuuliyad. Midowga Afrika iyo saaxiibbadu waxay ururin karaan inta kale, iyadoo mudnaanta la siinayo CASEVAC iyo MEDEVAC, shidaalka, raashinka iyo gaadiidka daad-gureynta. Lacagaha waxaa lagu hayn karaa sanduuq ay Qaramada Midoobay maamusho, oo lagu aasaaso qaraar Golaha Ammaanka ah.

Waxaa weli jirta suurtagalnimada in qaraarka noocaas ahi la hor istaago. Hase yeeshee, xaaladda siyaasadeed way is beddeli lahayd: diidmada lagu sheegay warqadda Maraykanku waxay ku saabsan tahay kharashka iyo qaybsiga culayska. Hannaan ay Afrika iyo Soomaaliya hoggaaminayaan, halka Qaramada Midoobay ay fulinta oo keliya qabato, wuxuu si toos ah uga jawaabayaa walaacaas.

Heshiiska kala-guurku waa inuu si cad u qeexaa waxa uu ilaalinayo marka laga soo tago howlgalka laftiisa: dalladda amni ee ay gudaha Soomaaliya ku shaqeeyaan safaaradaha, hay'adaha Qaramada Midoobay, iyo saaxiibbada gargaarka bani'aadannimo iyo horumarinta. Haddii aan dammaanad lagu kalsoonaan karo laga bixin kaabeyaasha amnigaas, go'aanka Maraykanku wuxuu sababi karaa in hay'adaha iyo saaxiibbada caalamiga ahi si ballaaran uga baxaan Soomaaliya, taas oo horseedi karta hoos-u-dhac sii xaqiijiya cabsidii laga qabay in joogitaankooda uu burburo.

## African-financed, UN-delivered

**CYPRUS**
Host government has paid ~1/3 of UNFICYP's budget for decades ($18-19m/yr).

**SAHEL**
MINUSMA supported the G5 Sahel Joint Force on a reimbursable basis, financed by the EU.

**SOMALIA**
The SSF Trust Fund (US, India and others) already channels voluntary money through UN delivery.

Somalia pays a share — modest, but politically transformative
→ AU + partners mobilize the remainder (~$250m bridging year)
→ Funds held in a UN-managed trust fund, established by UNSC resolution
→ UN delivers — CASEVAC/MEDEVAC first, then fuel, rations, lift

*The UN is the only entity able to deliver at this scale — and precedent for creative financing of UN delivery is well established.*

## Qiimeynta Hababka La Soo Jeediyey

Hababka siyaasadeed ee la soo jeediyey waa in lagu qiimeeyaa saddex qodob iyo hal miisaan oo lagu cabbiro khatarta. Qodobka koowaad waa sharciyadda siyaasadeed: habka la dooranayo ma yahay mid ay wada aqbali karaan Dowladda Federaalka, Dowlad-goboleedyada, Midowga Afrika iyo Golaha Ammaanka? Qodobka labaad waa awoodda farsamo: ma ku dhisan yahay nidaam saad oo dhab ahaan jira, mise awood aan weli la hayn oo keliya ayaa la rajaynayaa? Qodobka saddexaad waa is-afgaradka gobolka: ma mideynayaa dalalka ciidamada ku deeqay iyo dalalka deriska la ah Soomaaliya, mise wuxuu u kala qaybinayaa heshiisyo laba-geesood ah oo tartamaya?

Dhammaan hababkaas waxaa lagu eegayaa khatarta ka dhalan karta. Hab kasta oo keena hakad degdeg ah oo ku yimaada saadka, daad-gureynta dhaawacyada iyo bukaannada, ama awoodda lagu hayo deegaannada waa mid khatar ah, maadaama Al-Shabaab ay caadiyan tijaabiso kana faa'iidaysato meelaha daciifka ah ee ka dhasha kala-guurrada. Sii wadidda UNSOS iyadoo aan wax laga beddelin waxay luminaysaa taageerada siyaasadeed, gaar ahaan iyadoo ay jirto suurtagalnimada diidmada qayaxan ee Maraykanka. Wareejinta la dedejiyeyna ma buuxinayso shuruudaha farsamo, sababtoo ah lahaansho aan la socon awood hawlgal ma waari karto. Heshiis kala-guur oo lagu wada xaajoodo ayaa ah habka keliya ee si macquul ah uga gudbi kara saddexdaas tijaabo.

Hase yeeshee, hal shardi ayaa ka horreeya dhammaan afarta hab: midkoodna ma hirgeli karo haddii aan la helin hoggaan Soomaaliyeed oo xooggan, heer federaal iyo heer dowlad-goboleedba, kaas oo dib u soo celiya kalsoonida Midowga Afrika iyo dalalka ciidamada ku deeqay. Dalalkaasi muddo aan xad lahayn ma sii difaaci karaan joogitaanka ciidamadooda, Midowga Afrikana ma ururin karo maalgelin ama ciidan beddel ah isagoo taageeraya dowlad ay siyaasaddeedu muujinayso in howlgalka ay saaxiibbadeedu ka danaynayaan in ka badan Muqdisho. Hoggaanka Soomaaliyeed ma aha qodob keliya oo ka mid ah arrimaha jira; waa qodobka go'aaminaya guusha ama fashilka dhammaan hababka la soo jeediyey.

Midowga Afrika wuxuu gudaha ka eegay saddex waddo: helidda deeq-bixiyeyaal cusub, dhimista baaxadda howlgalka, ama bixitaan marxaladaysan. Waddadii koowaad waxay si cad u fashilantay 2025; tan labaadna waxay weli la kulmaysaa isla dhibaatada maalgelinta, inkasta oo baaxaddu ka yar tahay. Tan saddexaadna waxay xambaarsan tahay isdiiddo muhiim ah: xitaa bixitaan nidaamsan wuxuu u baahan yahay saadka la qorsheynayo in la joojiyo. Soo saarista ciidamada iyo dib-u-celinta qalabka Uganda, Jabuuti iyo dalalka kale horraanta 2027 laguma fulin karo gaadiid, dabool caafimaad iyo taageerada kolonyooyinka la'aantood. Sidaas darteed, go'aanka Maraykanku ma adkaynayo joogitaanka oo keliya; wuxuu sidoo kale adkaynayaa bixitaanka. Tani waa doodda ugu xooggan ee taageeraysa heshiis kala-guur.

Sidaas darteed, habka lagu taliyey waa heshiis kala-guur oo lagu wada xaajoodo. Waa inaan loo arkin xirmo lagu badbaadinayo AUSSOM, balse loo qaabeeyo heshiis kala-guur amni oo taageerada saadka ku xira dib-u-habayn la cabbiri karo. Soomaaliya waxay heli lahayd waqti iyo sii socoshada hawlgallada, halka ay beddelkeeda qaadi lahayd tallaabooyin cad. Kuwaas waxaa ka mid noqonaya hannaan isku-duwid amni oo ay ku jiraan dhammaan Dowlad-goboleedyadu, qiimeyn hufan oo lagu sameeyo diyaargarowga ciidamada, xakameyn adag oo lagu sameeyo mushaharka iyo saadka, iyo kala-qaybin cad oo lagu sameeyo masuuliyadaha ciidamada Soomaaliyeed iyo AUSSOM.

Heshiiskan kala-guurku wuxuu hal qodob oo muhiim ah kaga duwanaan lahaa heshiisyadii hore, laga soo bilaabo New Deal Compact-kii 2013, Security Pact-kii 2017, ilaa Mutual Accountability Framework. Heshiisyadaas waxay ballanqaadyada Soomaaliya ku beddelayeen taageero aan lahayn waqti kama dambays ah, iyadoo fulin la'aantu aysan lahayn cawaaqib muuqda, maadaama taageeradu si kastaba u sii soconaysay. Halkan se xaaladdu way is beddeshay.

Taageeradu waxay ku dhammaanaysaa taariikh cayiman, hubintuna waxay noqonaysaa mid bille ah halkii ay ku koobnaan lahayd shirar kala fog. Markii ugu horreysay, fulin la'aantu waxay labada dhinacba ku yeelanaysaa khasaare: saaxiibbadu waxay luminayaan howlgalka, Muqdisho-na waxay luminaysaa taageerada ay ku tiirsan tahay. Heshiisku ma filayo niyad-wanaag ka badan kii heshiisyadii hore; wuxuu isla ballanqaadyadii hore gelinayaa waqti kama dambays ah oo dhab ah.

Heshiiska waa in lagu saleeyaa laba hannaan oo wax looga qabanayo kalsooni-darrada labada dhinac. Marka koowaad, waa in howlgalka loo dejiyo taariikh kama dambays ah oo aan dib loo riixi karin, iyadoo tirada ciidamada si marxaladaysan looga dhimayo 11,826 ilaa eber taariikh lagu heshiiyey, sida Diseembar 2028. Marka labaad, howlgalka waa inuu bil kasta Golaha Nabadda iyo Ammaanka ee Midowga Afrika uga warbixiyaa horumarka laga gaaray halbeegyada lagu heshiiyey, si bixitaanku ugu salaysnaado caddeyn iyo waxqabad, halkii uu ku xirnaan lahaa kordhin joogto ah.

Heshiiska kala-guurku, sida loo qorsheeyey, waa buundo waqti kooban jiraysa, mana aha qaab-dhismeed cusub oo joogto ah. Waa hannaan maalgelin iyo saad oo soconaya qiyaastii laba sano, loona sameeyey in lagu maareeyo kala-guurka, kuna dhammaanaya marka kala-guurkaasi dhamaado.

Saaxiibbada caalamiga ah, heshiisku wuxuu siinayaa waddo looga hortago jahawareer amni oo aan la maareyn, iyadoo la hubinayo in taageeradu aysan noqon mid aan shuruud lahayn. Midowga Afrika, wuxuu ka ilaalinayaa dalalka ciidamada ku deeqay inay ku harayaan howlgal aan la maalgelin. Soomaaliya-na, wuxuu siinayaa waddo ay uga gudubto ku-tiirsanaanta una gaarto awood iyo maamul dheeraad ah, iyadoo aan lumin guulihii amni ee la gaaray.

## Talooyinka Siyaasadeed

Iyadoo ay harsan tahay shan bilood oo keliya, talooyinka hoose waxaa loo kala hormariyey iyadoo la eegayo laba jadwal oo is barbar socda: geeddi-socodka wadatashiga gudaha Midowga Afrika iyo wada-xaajoodyada Golaha Ammaanka ee la filayo Nofeembar–Diseembar 2026.

1. Dowladda Federaalka Soomaaliya waa inay go'aanka Maraykanka u aragtaa digniin istaraatiiji ah. Toddobaadyada soo socda waa inay qabataa wada-hadal amni oo u dhexeeya Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada, kaas oo diiradda saaraya AUSSOM, UNSOS iyo qorshe qaran oo kala-guur. Wada-hadalku waa inuu ka qaybgeliyo dhammaan Dowlad-goboleedyada, hay'adaha amniga iyo jilayaasha siyaasadeed ee ay khusayso. Ujeeddadiisu ma aha wadatashi magac-u-yaal ah, balse waa inuu soo saaraa mudnaano kooban oo lagu heshiiyey, si Soomaaliya hal mowqif ugu gasho wada-xaajoodyada xiga ee Qaramada Midoobay iyo Midowga Afrika. Dowladda Federaalka waa inay sidoo kale qayb ka noqotaa wada-hadallada laba-geesoodka ah ee lala yeelanayo dalalka ciidamada ku deeqay; haddii kale, waxaa jira khatar ah in go'aanno iyada khuseeya lagu gaaro New York iyo gobolka iyadoo aanay miiska joogin.

2. Dowladda Soomaaliya waa inay ka hor shirka xiga ee Midowga Afrika soo bandhigtaa qorshe qaran oo joogtayn ah, kharashkiisuna cad yahay. Qorshuhu waa inuu qeexaa hawlaha saadka ee ay hay'adaha Soomaaliyeed si tartiib ah ula wareegi karaan, kuwa u baahan taageerada Midowga Afrika ama Qaramada Midoobay, iyo kuwa u baahan taageero laba-geesood ah iyo cidda bixinaysa. Waa inuu noqdaa qorshe kharashkiisu caddahay, marxalado leh, kuna xiran diyaargarowga ciidamada. Sidoo kale waa inuu yeeshaa kormeer adag, maadaama aan cidina sii maalgelin doonin hannaan loo arko mid u nugul khasaaro ama faragelin siyaasadeed. Heshiiska kala-guurku waa inuu sidoo kale ka koobnaadaa wareejin lagu heshiiyey oo ku saabsan kaabeyaasha UNSOS, silsiladaha sahayda iyo xarumaha gobollada, iyadoo loo marayo hannaan ku-meel-gaar ah. Dib-u-habeynta dijitaalka ah ee hadda socotana waa in loo adeegsadaa halbeegyada isla-xisaabtanka ee ay deeq-bixiyeyaashu dalbanayaan.

3. Hoggaamiyeyaasha siyaasadda Soomaaliyeed waa inay amniga ka dhigaan mudnaanta koowaad ee qaranka. Khilaafaadka ku saabsan doorashooyinka, dib-u-habaynta dastuurka iyo awood-qaybsiga federaalka waa in lagu xalliyaa wada-hadal, ee aan lagu maareyn cadaadis siyaasadeed ama ciidan. Dagaalka Al-Shabaab iyo Daacish kama go'i karo xaaladda siyaasadeed ee dalka. Kala qaybsanaanta siyaasadeed waxay wiiqaysaa qorshe kasta oo amni, iyadoo aan loo eegin tirada ciidamada la geeyo. Waxaana muuqata in khilaafaadka siyaasadeed ay ka mid yihiin sababaha saaxiibka ugu saamaynta badan Soomaaliya uu uga sii durkayo taageerada dalka.

4. Golaha Nabadda iyo Ammaanka ee Midowga Afrika waa inuu go'aan qaataa, ee uusan dib u dhigin. Geeddi-socodka wadatashiga ee hadda socda—Guddiga Shaqaalaha Militariga, Taliyeyaasha Ciidamada Difaaca, shirka aan caadiga ahayn ee Golaha Nabadda iyo Ammaanka, iyo shir-madaxeedka aan caadiga ahayn—waa in lagu soo koobo go'aan waajib ah ka hor inta aysan furmin wada-xaajoodyada Golaha Ammaanku. Shirka aan caadiga ahayn ee Golaha Nabadda iyo Ammaanku waa inuu ansixiyaa hal soo-jeedin oo kharashkeedu cad yahay iyo awood-wakiilnimo qeexan oo la siiyo wada-xaajoodayaasha Midowga Afrika.

5. Midowga Afrika waa inuusan aqbalin howlgal aan la fulin karin. Waa inuu si cad u caddeeyo, sida ay hore uga digtay Waaxda Hawlgallada Taageerada Nabadda, in oggolaanshaha AUSSOM ay la socoto xirmo saad iyo maalgelin oo ku filan. Isla mar ahaantaana, Midowga Afrika waa inuu soo jeediyaa hannaan kala-guur oo waaqici ah, kaas oo si tartiib ah u dhimaya ku-tiirsanaanta UNSOS halka ay suurtagal tahay. Tani waxay ka koobnaan kartaa qorshe saad oo ay si wadajir ah u diyaariyaan Midowga Afrika iyo Qaramada Midoobay, wax-iibsi la mideeyey, hannaan gaadiid goboleed, iyo door cad oo dalalka ciidamada ku deeqay ay ku yeeshaan qorshaynta hawlgallada. Dalalka ciidamada ku deeqay waa inay Guddiga Midowga Afrika kala shaqeeyaan sidii sagaal iyo tobankii sano ee naf-hurnimada ahaa loogu beddeli lahaa awood wadajir ah oo lagu xaqiijiyo ballanqaadyo siyaasadeed iyo ciidan oo dhab ah oo ka yimaada Soomaaliya.

6. Midowga Afrika waa inuu dhammaadka howlgalka u maareeyaa siyaasad ahaan, isla markaana isagu hoggaamiyaa sida taariikhda loo qorayo. Taariikhdu badanaa waxay xusuusataa muuqaalkii ugu dambeeyey, halkii ay ka xusuusan lahayd sannadihii maalgashiga iyo naf-hurnimada. Sagaal iyo toban sano oo Soomaaliya laga shaqaynayey waa inaysan ku dhammaan muuqaal ka tarjumaya dayac ama ka tegid. Guddiga Midowga Afrika waa inuu magacaabaa koox kooban oo khubaro sare iyo masuuliyiin ah, kuwaas oo diyaariya diiwaan rasmi ah oo ku saabsan hawlgallada Midowga Afrika ee Soomaaliya: waxa la qabtay, taageeradii la ballanqaaday ee aan la helin, caqabadihii sababay dhimista howlgalka iyadoo aan heshiis siyaasadeed la gaarin, iyo qiimaha la bixiyey. Guddiga Midowga Afrika iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay si wadajir ah u qaban karaan kulamada dib-u-eegista, si diiwaanku u noqdo mid Afrikaan iyo Soomaali ah, ee uusan ku ekaan aragti hay'adeed. Marka Golaha Nabadda iyo Ammaanku ansixiyo, loona gudbiyo Golaha Ammaanka, diiwaankaasi wuxuu noqonayaa aaladda uu Midowga Afrika faylka dib ugu celinayo Golaha Ammaanka—heshiiskii lixda bilood ahaa ee 2007 oo si rasmi ah loogu celinayo hay'adda uu Qodobka 24aad ee Axdiga Qaramada Midoobay siinayo masuuliyadda koowaad ee nabadda iyo amniga caalamiga ah.

7. Qaramada Midoobay waa inay taageertaa kala-guur ku salaysan halbeegyo cad, halkii dooddu ku koobnaan lahayd in UNSOS sii jiro ama la soo afjaro. Ka hor wada-xaajoodyada howlgalka, Xoghaynta Qaramada Midoobay waa inay qeexdo hawlaha ugu yar ee lama huraanka u ah howlgalka, kuwaas oo maqnaanshahoodu sababi karo fashil—sida CASEVAC, MEDEVAC, shidaalka, raashinka iyo biyaha. Qaramada Midoobay waa inay hawlahaas ku dhistaa hannaan taageero oo dib loo qaabeeyey, laguna maalgelin karo meel ka baxsan miisaaniyadda lagu muransan yahay haddii loo baahdo. Warbixintii Xoghayaha Guud ee May 2026 (S/2026/446) ayaa durba jihadaas tilmaamaysa. Sidoo kale, Qaramada Midoobay waa inay qorshayso saamaynta ka dhalan karta xiritaanka UNTMIS bisha Oktoobar, iyadoo la hubinayo in kooxda dalka ku hartaa ay sii haysato awoodda isku-duwidda kala-guurka. Qorshaynta waxa beddelaya UNTMIS waa inay hadda bilaabataa. Tani waxay noqon kartaa joogitaan siyaasadeed oo cusub oo leh qayb ilaalin u gaar ah, iyadoo Cutubka Ilaalada Qaramada Midoobay ee Muqdisho uu tusaale shaqaynaya u yahay, iyo sanduuq nabadeed oo gaar ah oo maalgelinta lagu hago, si kala-guurka siyaasadeed iyo kan saadka loo qorsheeyo isku mar, halkii midba kan kale ka dambayn lahaa.

8. Saaxiibbada caalamiga ahi waa inaysan go'aanka Maraykanka ku dayanin oo aysan Soomaaliya ka bixin. AUSSOM iyo ciidamada Soomaaliyeed weli waxay ka hawlgalaan xaalad dagaal oo firfircoon oo ka dhan ah kooxaha hubaysan. Taageerada saaxiibbadu waa inay ku socotaa hal hannaan oo isku-duwan, halkii ay u kala bixi lahayd waddooyin laba-geesood ah oo Soomaaliya soo gelin kara loollan dibadeed.

Taageerada waa in loo weeciyaa awoodaha hawlgalka ee saamaynta weyn leh, iyadoo lagu xirayo shuruudo waaqici ah iyo natiijooyin la cabbiri karo. Kala-duwanaanshaha maalgelinta, Turkiga, Qatar iyo dalalka Khaliijku waxay keeni karaan kheyraad kala duwan, balse go'aamada siyaasadeed waa inay ka horreeyaan kuwa maaliyadeed.

Wada-hadalka Washington waa inuu diiradda saaraa sii wadidda cadaadiska ciidan ee tooska ah ee ka dhanka ah argagixisada inta lagu jiro dhimista howlgalka. Taageeradaasi waa inay noqotaa buundo waqti u iibisa Heshiiska Kala-guurka, ee aysan beddel u noqon joogtaynta ciidamada iyo hawlgallada.

**SOMALIA**

1. Political leaders return security to the centre of national priorities
2. FGS convenes federal-state dialogue within weeks — one national position
3. FGS tables a costed national sustainment plan before the extraordinary PSC session

**AFRICAN UNION**

4. PSC decides, not defers — one costed proposal into New York
5. Refuse any unfunded mandate — AU and TCCs as one bloc, converting nineteen years of sacrifice into leverage for Somali commitments

**UN & PARTNERS**

6. UN defines minimum functions (CASEVAC first) and designs the trust-fund mechanism
7. Partners coordinate in one framework; US kinetic pressure as a bridge, not a strategy

**THE STORY**

8. AU records what nineteen years achieved and cost — and formally hands the file back to the Security Council under Article 24

## Eight Recommendations in Order of Priority

## Gunaanad

Go'aanka Maraykanka ee ku saabsan UNSOS wuxuu bannaanka soo dhigay dhibaato sannado badan si cad u jirtay. Kala-guurka amniga Soomaaliya wuxuu waraaqaha kaga dheereeyey xaqiiqada dhabta ah. Howlgallada waa la cusboonaysiiyey, magacyadooda waa la beddelay, jadwalladana waa la hagaajiyey, balse su'aalaha salka u ah saadka, heshiiska siyaasadeed iyo amni ay Soomaalidu leedahay weli xal looma helin. Go'aankani wuxuu sidoo kale muujinayaa in 18 bilood oo digniino ahi aysan dhalin qorshe beddel ah.

AUSSOM oo aan UNSOS lahayn ma noqonayso oo keliya howlgal la dhimay; waxay isu beddeli kartaa howlgal aan awoodin inuu fuliyo waajibaadkiisa aasaasiga ah. Taasi waxay khatar ku tahay Soomaaliya, culaysna ku tahay dalalka ciidamada ku deeqay ee muddada dheer xambaarsanaa masuuliyadda, waxayna dhaawici kartaa kalsoonida taageerada caalamiga ah. Isla mar ahaantaana, sii wadidda qaabka hadda jira iyadoo aan dib-u-habayn lagu samayn waxay dib u dhigi lahayd oo keliya dhibaatada xigta. Waddada loo baahan yahay waa Heshiis Kala-guur oo si dhab ah u aqoonsan baahiyaha Soomaaliya, isla markaana si cad u qeexaya masuuliyadaha saaran. Waa inuu ilaaliyaa saadka muhiimka ah, isagoo ku xiraya horumar la cabbiri karo oo laga gaaro isku-duwidda Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada, isla-xisaabtanka hay'adaha amniga iyo diyaargarowga ciidamada.

Soomaaliya taageero way u baahan tahay, balse sidoo kale waxay u baahan tahay hoggaan siyaasadeed oo awood u leh inuu taageeradaas u beddelo awood qaran. Su'aashu ma aha in Soomaaliya ay amnigeeda yeelanayso iyo in kale; waa inay yeelataa. Su'aashu waxay tahay in kala-guurkaas si taxaddar leh loo qorshayn doono shanta bilood ee harsan, si loo ilaaliyo loona sii wado guulihii amni ee laga gaaray labaatankii sano ee la soo dhaafay.

## Tixraacyo


1. *African Union Support and Stabilization Mission in Somalia. 2025. "AUSSOM welcomes the UN Security Council's renewal of its mandate." 24 December 2025.* https://au-ssom.org/aussom-welcomes-the-un-security-councils-renewal-of-its-mandate/
2. *Al Jazeera. 2025. "US dramatically escalates air strikes on Somalia under Trump this year." 17 December 2025.* https://www.aljazeera.com/news/2025/12/17/us-dramatically-escalates-air-strikes-on-somalia-under-trump-this-year
3. *Amani Africa. 2026. "The US plan to unplug the UN Support Office in Somalia: the last straw that may break the African Union's peace operation." July 2026.* https://amaniafrica-et.org/the-us-plan-to-unplug-the-un-support-office-in-somalia-the-last-straw-that-may-break-the-african-unions-peace-operation/
4. *African Union Peace and Security Council. 2007. Communiqué of the 69th Meeting, PSC/PR/Comm(LXIX), authorizing the deployment of AMISOM. Addis Ababa, 19 January 2007; endorsed by United Nations Security Council Resolution 1744 (2007).*
5. *Associated Press. 2026. "Clashes erupt in Somalia's capital ahead of a planned anti-government rally." 4 June 2026.* https://www.nbcnews.com/world/africa/armed-clashes-erupt-somalias-capital-ahead-planned-anti-government-dem-rcna348416
6. *Balqiis Insights. 2024. Balancing Autonomy and Stability: UNSOM's Transition to a Country Office in Somalia. September 2024.*
7. *Balqiis Insights. 2024. Securing Somalia's Future: The Strategic Framework for AUSSOM, the Post-ATMIS Mission in Somalia. August 2024.*
8. *Balqiis Insights. 2025. Somalia's Fight Against Violent Extremism: Al-Shabaab and ISIS-Somalia. April 2025.*
9. *Combating Terrorism Center at West Point. 2025. "Somalia at a Crossroads: Resurgent Insurgents, Fragmented Politics, and the Uncertain Future of AUSSOM." CTC Sentinel.* https://ctc.westpoint.edu/somalia-at-a-crossroads-resurgent-insurgents-fragmented-politics-and-the-uncertain-future-of-aussom/
10. *Congressional Research Service. 2025. "United Nations Issues: U.S. Funding to the UN System" (IF10354), on FY2026 budget proposals and peacekeeping arrears.* https://www.congress.gov/crs-product/IF10354
11. *European External Action Service. 2026. "European Union confirms the largest contribution to the AU mission in Somalia (AUSSOM)" — €75 million European Peace Facility package. April 2026.* https://www.eeas.europa.eu/delegations/african-union-au/european-union-confirms-largest-contribution-au-mission-somalia-aussom_en

## Tixraacyo


12. *Garowe Online / Africanews / DW. 2026. Reporting on the AU emergency meeting of military advisers, Addis Ababa, 3 July 2026. https://www.garoweonline.com/en/news/somalia/african-union-holds-emergency-meeting-over-u-s-decision-to-end-support-for-somalia-mission*
13. *Institute for Security Studies. 2025–2026. "AU's Somalia peace mission cannot deliver on funding pledges alone"; "Two years on, UNSCR 2719 remains at a crossroads." https://issafrica.org/iss-today/au-s-somalia-peace-mission-cannot-deliver-on-funding-pledges-alone*
14. *International Crisis Group. 2026. "New Chapter, Same Stalemate: Somalia's War with Al-Shabaab." Briefing No. 212. https://www.crisisgroup.org/brf/africa/somalia/b212-new-chapter-same-stalemate-somalias-war-al-shabaab*
15. *IPI Global Observatory. 2026. "With AUSSOM's Funding Challenges Here to Stay, What Are the Options for the Mission's Future in Somalia?" January 2026. https://theglobalobservatory.org/2026/01/with-aussoms-funding-challenges-here-to-stay-what-are-the-options-for-the-missions-future-in-somalia/*
16. *Reuters. 2026. "Somalia peacekeeping mission at risk as US blocks UN support, sources say." 2 July 2026. https://www.reuters.com/world/africa/somalia-peacekeeping-mission-risk-us-blocks-un-support-sources-say-2026-07-02/*
17. *Security Council Report. 2026. "Somalia," June 2026 Monthly Forecast; and "Private Meeting on the African Union Support and Stabilization Mission in Somalia (AUSSOM)," What's In Blue, June 2026. https://www.securitycouncilreport.org/monthly-forecast/2026-06/somalia-43.php; https://www.securitycouncilreport.org/whatsinblue/2026/06/private-meeting-on-the-african-union-support-and-stabilization-mission-in-somalia-aussom.php*
18. *United Nations Security Council. 2025. Resolution 2809 (2025), extending AUSSOM's authorization to 31 December 2026 and deciding UNTMIS shall cease operations by 31 October 2026. Adopted unanimously, 23 December 2025. https://press.un.org/en/2025/sc16262.doc.htm*
19. *United Nations Security Council. 2023. Resolution 2719 (2023) on the financing of African Union-led peace support operations through United Nations assessed contributions. 21 December 2023.*
20. *United Nations Security Council. 2017. Resolution 2391 (2017) on MINUSMA support to the G5 Sahel Joint Force on a reimbursable, cost-recovery basis.*
21. *United Nations Secretary-General. 2026. Report on recommendations for appropriate adaptations to UNSOS support to AUSSOM and the status of voluntary resource mobilisation, S/2026/446. 29 May 2026.*
22. *United Nations General Assembly, Fifth Committee. 2025. Approved budgets for UNSOS, financial periods 2025/26 (US$537.2 million) and 2026/27 (US$481.7 million).*
23. *United Nations General Assembly. 2025. Report of the Secretary-General on the financing of African Union-led peace support operations, A/80/88. https://docs.un.org/en/A/80/88*

## Tixraacyo

24. *Force's budget is funded by the Government of Cyprus, with an annual voluntary contribution from Greece. https://unficyp.unmissions.org*
25. *UNSOS. 2026. "Support to Somali Security Forces" and "Support to UNTMIS" (mandate pages). https://unsos.unmissions.org/support-somali-security-forces*
26. *United States Mission to the African Union. 2026. Note Verbale 118-26 on ending U.S. support for UNSOS beyond the current AUSSOM authorization. Addis Ababa, 1 July 2026.*
27. *Williams, Paul D. 2018. Fighting for Peace in Somalia: A History and Analysis of the African Union Mission (AMISOM), 2007–2017. Oxford University Press.*